

— 807 —

BUUGGA LABAAD

OOGIDDA DACWADDA

BAABKA KOOWAAD

QAADISTA DACWADAHA DARAJADA KOOWAAD

MADAXA KOOWAAD

OOGIDDA DACWADDA

QAYBTA KOOWAAD

ARJIGA DACWADDA IYO U YEERIDDA

Qodobka 117aad

Sida loo Oogayo Dacwadda

Dacwadda waxaa lagu furayaa Arji u yeiid ah oo la geynayo Maxkamadda darajada koowaad ee awood u leh, taasoo u qabanaysa dhinacyada fadhi ay isugu yimaadaan, amraysana in la gaarsiyo iyadoo tixgelinaysa meesha ay waajibka tahay in lagu fuliyo gaarsiinta.

Waxaa waajib ku ah dhinacyada in ay yimaadaan fadhiga ugu horreeya taasoo Garsooruhu isku deyayo in uu heshiis ku dhammeeyo Dacwadda.

Haddii dhinacyada midna ka imaan fadhiga hore, amase uusan imaan dacwoodaha, dacweysanuhuna uusan weydiisan in dacwadda hore loo wado, xataa isagoo maqan (Dacwoodaha) dacwadda wey dhacaysaa.

Haddii uu maqnaado dacweysanaha, Garsooraha isagoo qiimeynana joogistiisa, wuxuu amri karayaa in la keeno Maxkamadda.

Qodobka 118aad

Xukunka caddaaladda ku dhisan (secondo equità)

Haddii dacwadda ay ku saabsan tahay xuquuq laga tanasuli karo dhinacyada waxaa u bannaan inay ku heshiiyaan in xukunka Garsooruhu ku dhisnaado Caddaaladda.

34
RGJ
SAA

Qodobka 119aad

Waxyaabaha la doonayo in laga helo arjiga dacwadda

Arjiga dacwadda ee lagu xusay Qoddobka 117 waa in laga helaa waxyaabahaan:

- 1 — Tilmaanta Maxkamadda horteeda dacwadda la geeyey.
- 2 — Magaca oo dhan iyo meesha uu deggan yahay Dacwoodaha, magaca oo dhan iyo meesha uu deggan yahay Dacweysanuhu iyo dadka iyaga ku kaalmaynaya Maxkamadda horteeda.
Haddii dacwoodaha ama dacweysanaha uu yahay qof leh shakhsiyad Qaanuuneed (xeereed) dacwadda waa inay koobtaa magaceeda iyo tilmaanta xubinta ama xafiiska ka qaba wakaalo.
- 3 — Xaddidaad dulucda Dacwadda.
- 4 — In la sheego falka iyo mabaadi'da Xeerka saldhigga u ah dacwadda oo ay la socdaan gebengebaynta Dacwadda.
- 5 — Tilmaanta qodobka sugidda ee uu dacwooduhu doonayo inuu ku isticmaalo iyo Dukumentooyinka uu soo bandhigayo.
- 6 — Magaca Wakiilka iyo tilmaanta Wakaaladda, haddii wakaalasho ay jirto.
- 7 — Tilmaanta Taariikhda fadhiga ee Garsooruhu uu u qabtay imatinka dhinacyada, marka ugu horeysa iyo wacidda dacweysanaha in uu yimaado fadhiga loo soo tilmaamay. Asalka dacwadda ee ay la socdaan waxyaalaha la soo sheegay waa in uu dacwooduhu gaarsiiyaa dacweysanaha.

Qodobka 120aad

ku dhigidda dacwadda diiwaanka Guud, furidda galka xatiska iyo dhex gelinta xusuusinta dhigidda galka

Markuu helo dacwadda lagu soo sheegay Qodobka aan soo marnay Kaaliyaha Maxkamadda ee hortaada dacwaddu taal, wuxuu Dacwadda ku qorayaa diiwaanka Guud, wuxuuna furayaa galka Xafiiska isagoo ku dhexridaya xusuus qoridda diiwaanka iyo nuqul ka mid ah arjiga dacwadda. Galka xafiiska markaas wixii ka dambeeya waxaa lagu ridayaa warqadaha dhammaantood, hawshaasna waxay saaran tahay Kaaliyaha.

Qodobka 121aad

Muddada Imaatinka

Taariikhda gaarsiinta u yeeridda iyo imaatinka, waa inay u dheexeeyaan ugu yaraan muddooyinka soo socda:

— 809 —

15 beri, haddii meesha gaarsiinta ay ku taalo inta Maxkamaddu awoodda u leedahay.

30 Beri, haddii meesha gaarsiinta laga helo meel ka baxsan awoodda Maxkamadda, laakiinse gobolkaas ayna ka baxsanayn.

40 Beri, haddii meesha gaarsiinta ay ka baxsan tahay Gobolka.

80 beri, haddii meesha gaarsiintu laga helo dhu. shisheeye ah oo aan ka baxsanayn Qaaradda Afrika.

160 beri, haddii meesha gaarsiintu ay tahay Qaracaha kale. Garsooraha dacwadda ay hor taal waxaa u bannaan haddii sidaas uu weydiiyo dacwoodaha. ayna jiraan sababo gaar ah ee keenaya degdeg, inuu ku gaabiyo Dekereeto sababeysan ilaa saddex meelood meel muddooyin a kor lagu soo sheegay.

Qodobka 122aad

Burrinta arjiga dacwadda

Arjiga dacwadda waa baaba'a haddii uu ka maqan yahay ama dhammaan aan la hubin shuruudda lagu xusay Qodobka 119 amase la siiyey muddo ka yar tan lagu tilmaamay qodobka 121.

Baabi'intaas waxaa lagu daaweyn karaa imanshaha dacweysanaha, ayadoo la dhowrayo xuquuqii uu horay u yeeshay.

Qodobka 123aad

Immaanshada dhinacyada

Haddii ay wada yimaadaan Maxkamadda, dacwoodaha iyo dacweysanaha, dacweysanaha hadal ama qoraal ahaan buu u jeedinayaa difaacis, haddii ay jiraan dacwooyin is hortaag iyo tilmaanta qalabka sugidaha ee uu doonayo inuu ku astimaalo.

Haddii uu doonayo inuu waco qof saddexaad, dacweysanuhu waa inuu ku caddeeyaa fadhiga ugu horeeya ee Maxkamadda.

Qodobka 124aad

Gaarsiin iyo ogeysiin dacwadda dhexdeeda

Dhismaha Maxkamadda kaddib, dhammaan gaarsiinta iyo ogeysiinta waxaa loo dirayaa wakiilka, ahinaca ama haddii uusan jirin wakiil, waxaa loo dirayaa meesha ay dhinacyadu tilmaanteen.